ISU XILQAAN SWIIDHAN SIDAN KA SII AMMAAN BADAN!

Waa laguu baahanyahay! Sida aad awooddid ula jir oo gacan uga geyso guul-doorasho oo u soo hoyata xisbiga bulshada dimuquraadiga ah. La hadal saaxib caadi ah, saaxib shaqo ama deris ama ololaha doorashada nagala qeyb qaado. Xubin ka noqo Xisbiga bulshada dimuquraadiga ah (Socialdemokraterna)!

Socialdemokraterna

Nagala soco Facebook Instagram Twitter

Qoraalkan waa mid loo beddelay swiidhish fudud oo laga diyaariyay qoraalki asalka ahaa. Haddii uu farqi yari u dhexeeyo nuqullada waxaa lagu camal falayaa nuqulka asalka ah.

☐ Waxaan doonayaa in aan xubin ka noqdo Xisbiga bulshada dimuquraadiga ah (Socialdemokraterna)

☐ Waxaan doonayaa in aan wararka idinka helo

Magac .....

Taleefan ..... E-mail .....

Cinwaan .....

Nambarka boostada iyo xaafadda .....

Nambarrada aqoonsiga ☐☐☐☐☐ ☐☐☐☐

Gal bogga socialdemokraterna.se/bli-medlem ama buuxi qeybta la gooyo, baqshad ku rid ee boosto noogu soo dir. Cinwaankan ku qor si aadan ugu baahan in aad farankaboollo saartid:

Socialdemokraterna
Svarspost
Kundnummer 110 651 700
110 03 Stockholm

Waannu keydsan doonna macluumaadkaaga. Wax dheeraad ah ka akhriso socialdemokraterna.se/integritetspolicy

Somaliska

Socialdemokraterna

BULSHO SIDA MAANTA KA XOOG BADAN. SWIIDHAN SIDAN KA AAMIN BADAN.

DOORO BULSHO SIDAN KA XOOG BADAN IYO SWIIDHAN SIDAN KA AAMIN BADAN!

Waan ogahay waxa uu ammaan qofka bani'aadamka ah ugu dhignaan karo. Waan ogahay taas, aniga oo ka duulaya laga billaabo koritaankeygi canug la soo korsaday ahaan, dadka shaqo la'aanta ah ee aan kula kulmay wershadaha iyo dhammaan dadka da'da ah ee aan maanta ra'isul wasaare ahaan la kulmo: ammaan in uu jiro ayaa mar walba loo baahanyahay si aan u dareenno faraxsanaan iyo xurriyad.

Iminka dhaqaalaha swiidhishku aad buu u xoogganyahay. Laga soo billaabay 2014 waxaa shaqo aada 300 000 oo dheeraad ah. Shaqo la'aanta dhallinyaradu waxay gaartay meeshi ugu hooseysa muddo 16 sano ah. Dib u qaabeyn ayaan ku sameynay siyaasaddii socdaalka ee aan sii socon karin, waxaannuna sameynay in inta kaalmada masruufka bulshada ka qaadata ay maanta tahay inta ugu hooseysa laga soo billaabo 1981.

Awooddaas waxaan rabnaa in aan u adeegsanno in aan fulinno barnaamijka ammaanka- ee ugu weyn casrigan la joogo. Hadafkeennu waa bulsho aad u xoog badan. Oo awood u leh in ay dugsiyada iyo hey'adaha caafimaadka ka shaqaaleysiiso in badan iyo in ay hubiso in gaboobiddu aysan ka dhignaanin faqrinimo. Oo awood u leh in ay dagaal aan loo aabayeelin ku qaado dembiyada. Oo hubineysa in dhammaan kuwa doonaya in ay shaqeeyaan ay sidoo kale shaqeeyaan. Oo garab taagan marka aad taageero u baahantihid laakiin sidoo kalana shuruudo qofka u dhigaya. Oo awood u leh in uu si sal iyo baar ah wax uga qabto kala qoqobnaanta, si uu waddankeennu isu heysato.

Laakiin doorashada adiga ayaa leh. Waxaa jira kuwo taa beddelkeeda doonaya in ay arkaan in suuqu xalliyo arrimaha dugsiyada iyo caafimaadka. Oo doonaya in ay lacagta u isticmaalaan in ay mar kale kuwa waxa ugu badan heysta ugu sameeyaan canshuur dhimis aad u weyn, iyo in ay dadka caadiga ahi bixiyaan kharashka iyadoo barwaaqo sooranka hoos loo dhigayo.

Sidaas awgeed codsigeygu wuu fududyahay: Ka qeyb qaado oo abuur bulsho sidan ka xoog badan iyo Swiidhan sidan ka ammaan badan. Maalinta 9 Sebteembar dooro Xisbiga bulshada dimuquraadiga ah (Socialdemokraterna)!

Stefan Löfven

BARNAAMIJKA AMMAANKA EE UGU WEYN CASRIGA LA JOOGO

IYADOO AMMAANKA LOO MARAYO BARWAAQO SOORAN XOOG LEH

Waxaan dooneynaa:

In aan shaqaale dheeraad ah ka shaqaaleysiinno hey'adaha caafimaadka. Waxaan hey'adaha caafimaadka ka shaqaaleysiinayaa ugu yaraan 14 000 oo dheeraad ah si aan shaqaalaha culeyska uga yareyno, aan safafka u yareyno, loona helo daryeel kan maanta ka degdeg badan.

In aan joojinno faa'iido ka ugaarsiga laamaha barwaaqo sooran. Waxaan soo rogeynaa xeerar iyo faa'iido xaddidid si lacagta loogu tala galay barwaaqo sooranku ay u aaddo barwaaqo sooranka. Waxaan sidoo kale mamnuuceynaa dugsiyada xurta ah ee diimaha.

Waxaan kor u qaadeynaa lacagaha hawlgabka. Kuwo noloshooda oo dhan ku shaqeynayay mushaar iska liita waxay helayaan lacag hawlgab oo inta maanta ka sarreysa iyadoo wax lagu daraayo lacagta hawlgabka guud, waxaannu qaadeynaa tallaabta ugu dambeysa si canshuurta xaq darrada ah ee hawlgabka loo joojiyo gebi ahaanba.

AMMAAN IYADOO GACAN ADAG DEMBIYADA LAGU QABANAYO

Waxaan dooneynaa:

In aan shaqaaleysiinno boolis fara badan. Waxaan xagga booliska shaqaaleysiin doonnaa 10 000 oo dheeraad ah ilaa iyo 2024, si dembiyo badan loo furfuro, waddooyinka iyo suuqana amni looga abuuro.

In aan joojinno xad gudubyada ka dhanka ah dumarka. Waxaannu la dagaallameynaa xad gudubyada ragga ee ka dhanka ah dumarka.

In aan dhallinyarada ka celinno in ay ku dhacaan dimbiilanimo. Waxaan la imaaneynaa siyaasad weerareysa meelaha ay dembiyadu ka soo burqadaan iyadoo aannu yareyneyno farqiga bulshada u dhexeeya, lana dagaallameyna caddaalad darrada, iyadoo aan goor hore dadaallo gelineyno waxa, heleynana waddooyin badan oo dembiilanimada looga baxo.

AMMAAN KU IMAANAYA IS DHEX GAL SIDII HORE KA DEGDEG BADAN

Waxaan dooneynaa:

In aan hubinno in dhammaan dadku ay shaqeeyaan, iyadoon la eegeyn jinsi ama halka ay ka soo jeedaan. Waxaan dagaal u geleynaa duruufo shaqo iyo mushaar wanaagsan. Waxaan dadaallo waxbarasho oo waaweyn ku abuureynaa fursado si dhammaan dadku ay u shaqeyn karaan. Isla mar ahaantaas waxaan si buuxda u caddeyneynaa in waddada qeyb Swiidhan looga noqon karo ay marto iyadoo uu qofku is masruufo.

In aan joojinno quwadaha wax takooraya. Waxaan la dagaallami doonnaa nuuc walba oo dagaalyahanno xigjir siyaasadeed iyo mid diimeed ah.

Xagga waajibka luqadda. Dhammaan kuwa aan shaqeyn karin iyadoo ay sababtu tahay in aysan swiidhish aqoonnin waa in ay bartaan luqadda.